

qaybqaadahaada arrimo baaritaan. Xeerarka OFCCP ayaa kaa difaacaya adiga xasaradaynta, cabsigelinta, hanjabaadda, wax ku dirqiga, ama kaga aargoosiga ku dhaqanka xuquuqdaada.

14. Maxaa dhici doona haddii ay jirto helitaan inaan ahaa dhibbane ka takoor shaqo?

Waxa laga yaabaa inaad u mudnaato xallin kugu meelaya booskii ay hayd inaad qabato haddii aanu kala takoor ku dhici lahayn. Waxa laga yaabaa inaad u mudnaato in lagu shaqaaleeyo, lagu dallacsiyo, shaqada dib laguugu soo celiyo, ama shaqo kale laguuga hagaajiyo. Waxa kale oo laga yaabaa inaad u mudnaato helitaan lacag bixinta kuugu maqan shaqada, lacag horay lagaa siiyo, lacag u kordhin, ama arrimo qaarkood oo iskugu jira xallimaas. Waxa intaa u dheer, haddii OFCCP ay ogaato inuu qandaraaslaha federaalka ama kuwa ka hoos shaqeeyaa ay ku xadgudbeen xeerka Qaybta 503, OFCCP ayaa ku kici doonta sidii shirkadda looga hor istaagi lahaa ama looga tirtiri lahaan u tixgalinta qandaraasyada federaalka ee mustaqbalka ma in shirkadda in laga noqdo heshiyyadda qandaraasyada iyo wax la hal maala ee haatan jira.

Wixii macluumaad dheeraad ah:

THE U.S. DEPARTMENT OF LABOR

Office of Federal Contract Compliance Programs

200 Constitution Avenue, NW

Washington, D.C. 20210

1-800-397-6251

TTY: 1-877-889-5627

www.dol.gov/ofccp

Fadlan la soco inay xaashidan xaqiiqdu bixinayso macluumaad guud. Looguma talagal inuu baddalo meesheedii sharciyada iyo qawaaniinta dhabta ah ee ku saabsan barnaamijka halka lagu soo qaaday.



200 CONSTITUTION AVENUE NW | WASHINGTON, DC 20210 | tel: 1-800-397-6251 | TTY: 1-877-889-5627 | www.dol.gov/ofccp

OGOW XUQUUQDAADA

Daljirayaashii Hore ee Xuquuqda Difaacan Leh

OFCCP Ayaa Ka Difaacda

Daljirayaashii Hore Kala Takoorka

Xafiiska u Hoggaansanka Barnaamijyada Qandaraaska Federaalka (OFCCP) ayaa hirgalisa xeerarka ficillada u oggolaanta Xeerka Gargaarka Arrimo Dib Ula-qabsiga Daljirayaashii Waagii Fiyetnaam ee 1974. Sharcigan, ayaa mararka qaarkood loogu yeeraa VEVRAA, oo waxay uga baahan tahay loo-shaqeeyayaasha la macaamila Dowladda Federaalka inay qaadaan tallaabooyin ay ku qorayaan, ku shaqaaleynayaan, oo ugu dallacsiinayaan daljirayaashii hore ee xuquuqda difaacsan leh. Waxa kale oo ay ka dhigaysaa sharci-darro iany shirkadaha kala takoor ku sameeyaan daljireyaashan la difaaco kuwaas markay gaarayaan go'aannada shaqo qorka, eryidda, bixinta, dheefaha, shaqo ku hagaajinta, dallacinta, shaqo muddo ka hakinta, tababbaritaanka iyo hawlaha kale ee la xiriira shaqada.

1. Waa maxay ku kala takooridda shaqo ee ku salaysan xaaladda ahaanta daljiraha hore ee xuquuqda difaacsan leh?

Ku kala takoor shaqada ee ku salaysan xaaladda ahaanta daljiraha hore ee xuquuqda difaacsan leh ayaa dhacdaa marka markuu loo-shaqeeye adiga kuula dhaqmo, shaqaale ama shaqo codsade ahaan, si aan habboonayn maadaam aad ka tirsan tahay mid ka mid ah qaybaha daljirayaashii hore ee xuquuqda difaacsan leh ee hoos yimaada VEVRAA.

2. Ayaa ah “daljiraha hore ee xuquuqda difaacsan leh” markay hoos timaad VEVRAA?

Waxaad ugu tahay “daljiraha hore ee xuquuqda difaacsan leh” hoosta VEVRAA haddii aad ka tirsan tahay qaybaha daljiraha hore ee lagu sifeeyay hoosta:

• Daljirayaashi Hore ee Naafada ah

Daljiraha hore ee ku waajibaaka firforcoon ka gutay ciidamada Maraykanka ee u mudan magdhowga naafanimada (ama markay tahay qaadashada bixinta hawgabka ciidanka u mudnaan doona magdhowga naafanimada) hoosta sharciyada u maamulo Xoghayaha Arrimaha Daljirayaashaa Hore, ama la ruqseeyay ama laga siidaayay xilka awgeed naafanimada la-xiirta-adeegga.

• Daljiraha Hore ee Ilaashan

Daljiraha hore ee ku waajibaaka firforcoon ka gutay ciidamada Maraykanka muddo dagaal jiray, ama olole ama safar oo billad olole loo oggolaaday iyada hoo hoos timaad sharciyada ay maamusho Wasaaradda difaacu.

• Daljiraha Hore ee dhowaan Xiriirka Loo Gooyay

Daljiraha hore ee xiriirka loo gooyay muddadii ahayd saddexii sano ee ka bilaabantay ruqsaynta ama siidaynta daljiraha ama ka siidaynta waajibka firfircoo ee ku jira ciidamada Maraykanka.

• Daljirihii hore ee Billadda Ciidamada La siiyay; iyo

Daljiraha hore ee, markuu ka gudanayay waajibaadyada firfircoon ciidamada Maraykanka, ka qaybqaatay hawlgaal ciidamo Maraykan helay bilad ah adeegga ciidamada qalabka sida.

Qaar ka mid ah qandaraasyada Federaalka iyo kuwa ka hoos shaqeeya ee heshiiska lala galay ka hor Disember 2003, qaybaha daljirayaasha hore ee xuquuqda difaacsan leh ee hoos yimaada VEVRAA ayaa woxoogaa ka duwan. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan inay gudashadaadii xilka ciidamadu ay mudnaan kuu siinayaan inaad noqoro daljire hore oo xuquuq difaacsan leh iyo in kaleba, waa inaad la xiriirtaa OFCCP adiga oo u mara macluumaadka kula la xiriirka ee hoose lagu bixiyay.

3. Ayay OFCCP difaacdaa?

OFCCP ayaa difaacda xuquuqda shaqaalaha iyo codsadyaasha shaqada ee shirkadaha hawlaha la qabanaya Dowladda Federaalka. Kuwaas waxa ka mid ah shirkadaha teknoolojiyadda macluumaadka, warshadaha hilibka, dukaamada tafaariiqda, warshadaha wax soo saarka, shirkadaha xisaabaadka, iyo shirkadaha dhismaha, iyo kuwo intaa u dheer.



200 CONSTITUTION AVENUE NW | WASHINGTON, DC 20210 | tel: 1-800-397-6251 | TTY: 1-877-889-5627 | www.dol.gov/ofccp

4. Waa maxay xuquuqdaydu ahaanta daljire hore oo leh xuquuq difaacsan?

Markaad tahay daljire hore oo xuquuq difaacan ku hoos leh VEVRAA, waxaad xaq u leedahay inaad ka shaqayso jawii xor ka ah kala takoorka. Adiga laguugma diidi karo shaqo, oo laguguma samayn doono xasaradayn, xil hoos uga dhig, shaqo ka eryid, lacag bixin ka yarayn, ama lagu la dhaqmi si xun sababta oo ah xaaladda ahaanta daljire hore.

Haddii aad tahay shaqaale iyo daljire hore oo qaba naafanimo waxaad weyddiisan kartaa “ u waafajin macquul ah.” U waafajinta macquulka ah ayaa ah mid kuu adiga oggolaanaysa inaad hawshaada qabsato, oo waa inuu bixiyaa loo-shaqeeyahaagu haddii ay markuu sidaas sameeyo ay u horseedi doonto loo-shaqeeyaha dibaato ama kharash aad u badan mooye.

Sidoo kale, haddii aad tahay daljire hore oo naafo ah codsanaya shaqo, loo-shaqeeyahaagu waa inuu ku siiyaa u waafajin macquul ah inta lagu guda jiro nidaamka codsiga in laguugu ogolaado inaad codsato oo lagu tixgeliyo shaqada. Mar kale, u waafajinta macquulka ah waa in lagu siiyaa haddii ay noqonayo mid aad u adag ama aad u qaali ah in sidaas la sameeyo mooye.

5. Waa maxay u “waafajinta macquulka ahi”?

U “waafajinta macquulka ah” ayaa ah u dheellitir ama u beddel lagu sameeyo goobta shaqada, ama habka caadiga ee hawsha loo fuliyo, ee u saamaxaysa daljirahii hore ee naafada ah inuu guto waajibada shaqada ama u ka faa’iidaysto dheefaha iyo arrimo u mudnaanta shaqada. U waafajinta macquul ah ayaa beddeli doonin hawlgallada shaqo ee lama huraanka ah. Loo-shaqeeyuhu waa inuu waliba u sameeyaa u waafajin macquul ah ee u saamaxaysa daljirahii hore ee naafada ah ee raadsanaya shaqadu inuu awood ugu codsashada shaqada.

Loo-shaqeeyahaaga ayaa dooran kara nooca u waafajinta macquul ah ee lagu diyaarin doono; hase ahaatee, u waafajintu waa wax ku ool yeelato. Tusaale ahaan, loo-shaqeeyahaaga ayaa dooran kara inuu kii sameeyo dariiqo kugu habboon halkii wiishka aad u isticmaali lahayd asi wax looga qabto arrimaha marin u helka shaqada.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u codsan u waafajin macquul ah waxaa laga heli karaa <https://www.dol.gov/ofccp/posters/ReasonableAccommodationPocketCard/index.htm>.

6. Maxay yihiin tusaalooyinka qaarkood ee “u waafajinta macquul ah” ee lagu siin karo muddada nidaamka shaqaalaynta iyo hadhow inay kaa caawiso shaqo fulinta?

U waafajinta macquulka ah noqon karta qaabab badan. Waxaan halkan ku liis garanaynaa u waafajintnada caadiga hoosta.

- Bixinta agabyo qoraalka ah oo ku qaab marin loo heli karo, oo ah sida farta waawayn, Braille, ama cajalad dhegaysi.
- Dheelitirka ama u beddelidda jadwalka shaqada.
- U fidinta u akhriyeyaal ama turjubaano luqadda calaamadaha.
- Qabashada kulanka shaqo qorista, waraysiyo, imtixaanno, iyo qaybaha kale ee nidaamka codsiga ee ku yaal goobaha marinka loo heli karo.
- U qabashada shirarka shaqaalaha ee goobaha marinka loo heli karo.
- Siinta ama q u beddelka qalabka iyo aaladaha.
- Iskugu hagaajinta iyo u beddelka siyaasadha iyo habraacyada.
- U beddelka jawiga shaqada si loo fiicneeyo marin u helka.

Helitaanka Fursadaha Shaqada

7. Halkee ayaan ka heli karaa adeegyo shaqo iga caawin doona anigu inaan helo shaqo?

Ilaha u jira inay caawiyaan daljirayaashii hore inay helaan shaqo ama adeegyada kale ayay ka mid yihiin:

1. Xafiisyada adeegga shaqada ee gagaarka ku yaal ama xarumaha American Job Centers, oo fidiya adeegyo daljirayaashi hore oo ku jiraan u qorshayn mihnadeed, ilaha shaqo raadinta, tababaritaan, iyo u dirid loo shaqeeyayaasha shaqada qoraya. Waxaad ka heli kartaa xafiiska adeegga shaqada ee deegaanka ama American Job Center ee kuugu dhow <http://www.careeronestop.org/localhelp/local-help.aspx>. Waaxada Shaqada iyo Shaqaalaha ayaa kafaala qaadatabartaas internet.
2. Hagaha Ilaha Qaranka (NRD) ayaa ha Bar Internet loogu talagalay inay ku xirto daljirayaashi hore iyo qoysaskooda hay’ado kala duwan oo leh barnaamijyo taageero si gaar ah dadkaas loogu talagalay. NRD ayaa bixisa marin u helka fursadaha shaqo, macluumaad dheef, iyo fursadaha waxbarashada iyo tababbarka. Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha, oo ay isbahaysanayaan Wasaaradda Difaaca, wasaaradda Arrimaha Daljira Hore, Adeeyada Ciidamada ayaa

kafaala qaada bartan internet. Barta NRD waxa laga heli karaa onlayn halkan <https://www.nationalresourcedirectory.gov/>.

8. Miyay VEVRAA uga baahan atahy qandaraaslayaasha Federaalka inay qaadaan tallaabooyin gaar ah si shaqo loo qoro daljirayaashii hore xuquudada difaacan leh?

Qandaraaslayaasha Federaalku waa inay ku soo liis gareeyaan shaqooyinka xafiiska adeegga shaqada deegaanka ah ama xarunta American Job Center si ay daljireyaashii hore ugu heli karaan u gudbin mudnaan hore leh shaqooyinkooda furan. Gobollada oo dhan ayaa leh bangiyo shaqo onlayn ah oo loo-shaqeeyayaashu ku soo liis garayn karaan shaqooyinka furan oo shaqo doonkuna ka baaran karaan ah ka raadin shaqooyinka. Si aad u hesho liiska shaqooyinka ee deegaanka booqo <http://careeronestop.org/>. Intaa waxa u dheer, loo-shaqeeyayaasha ayaa lagu dhiirigelinayaa inay iskaashadaan kooxaha daljireyaashii hore ee agagaarka ku yaalsi ay u qoraan daljireyaashi hore ee uqalma shaqada.

9. Miyay daljirayaashii hore ee xuquuda difaacan leh helaan doorbid marka shaqada la qorayo?

Dowladda Federaalka sida caadiga ah siisa doorbidka shaqaalaynta daljirayaashii hore ee naafada ah, iyo daljirayaashii gutay waajibka firfircoon ee Ciidamada Qalabka muddooyinka qaarkood ama in ololayaasha ciidanka, markay shaqooyin u qorayaan shaqooyinka dawladda. Loo-shaqeeyayaasha meheraddooda gaarka loo leeyahay, oo ay ku jiraan kuwa ay wada macaamilaan Dowladda Federaalka, ayaan looga baahnayn doorbidka shaqo qorka daljireyaashi hore.

Sharciyada doorbidka daljirayaashii hore ayaan dammaanad ka qaadayn shaqo oo ma siiyaan daljirayaashii hore doorbid ficillada hay’ad gude sida dallacinta, beddelidda, dib ugu hagaajinta shaqada iyo shaqo ku soo celinta.

10. Loo-shaqeeye miyuu iigu soo fidin karaa mushahar ka hooseeya sidii hore ama i siin doonaa lacag ka yar intay siiyaan shaqaalaha kale markaa qabanayso shaqo isku mid ah maadaama aan helo bixinta hawlgabka ciidamada?

Maya, loo-shaqeeye kaama yarayn karo mushaharkaaga ama bixin ka yar kuma siinayo awgeed adiga oo qaata hawlgabka ciidamada.

Xereynta Cabashada

11. Maxaan sameeyaa haddii aan aaminsanahay inuu loo-shaqeeyuhu uu aniga ii takooray ahaan daljire hore oo xuquuq difaacan?

Waxaad ku xerayn kartaa cabasho OFCCP. Uma baahnid inaad xaqiiq u ogaado inuu loo-shaqeeyahaagu waa qandaraasle federaal ama ka sii hoos haystae qandaraas yahay si aad u xerayso cabasho.

12. Sideen ayaan ugu xereeyaa cabasho OFCCP?

Waxaad xerayn kartaa cabasho kala takoor adiga oo:

- Buuxiya oo gudbiya foom onlayn ah oo loo maro barta internetka OFCCP; ama
- Buuxiya foom adiga oo qof ahaan yimaad xafiis OFCCP; ama
- Ugu soo dir boostada, iimayl, ama faaks foomkaad buuxisay xafiiska degmeedka OFCCP ee ku lug leh goobta aad ka sheeganayso eedda takooru inay ka dhacaday.

Foomka waxaa laga heli karaa onlayn halkan <https://www.dol.gov/ofccp/regs/compliance/pdf/pdfstart.htm> iyo iyada oo ah qaab warqad ah dhammaan xafiisyada OFCCP. Si aad u hesho xafiiska ugu dhow meesha aad ku nooshahay, booqo liiska onlaynka ah ee xafiisyada OFCCP ee ku yaal: www.dol.gov/ofccp/contacts/ofnation2.htm.

Waa inaad xusuusnaato inaad saxiixdo foomka cabashada ee aad buuxisay. Haddii aad ka gaabiso yeelidda sidaas, OFCCP ayaa weli kaa aqbali doonta cabashadaada laakiin arrimo baare OFCCP ayaa ku weyddiisan doonaa inaad saxiixdo foomka marka la joogo ballanta waraysiga ee xigta. Cabashooyinka leh eedaynta ku salaysan ku takoorka ahaanta xaalad daljire hore oo difaacan waa in lagu xereeyaa 300 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda eedaynta takoorka, haddii waqtiga ku xeraynta loo dheeray sabab macquul ah mooye.

Waxa kale oo aad waliba ku xerayn kartaa cabasho Adeegga Shaqada iyo Tababbarka Waaxda Shaqada iyo Shaqaalaha ama Wakiilka Shaqada Daljirayaashii Hore ee xafiiska adeegga shaqada deegaanka ku yaal ama xarunta American Job Center. Cabashooyinkaas ayaa loo soo wareejin doonaa OFCCP.

13. Miyuu loo-shaqeeyahygu iga eryi karaa, ama xilkayga shaqada xooos u dhigi karaa ama iila dhaqmi karaa si ka xun sidii hore maadama aan xereweyay cabasho?

Maya. Waa sharci-darro inuu loo-shaqeeyahaagu kaaga aargoosto xereyantaada cabashada ama ka